
# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Beeraleygii iyo Abuurkii



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: M. Maillot, Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: E. Frischbutter, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Maalin buu Ciise harada agteeda ax ku baray. Dad badan baan aisugu yimid inay dhegeystaan. Dadkii isu soo ururayna aad bay u badnaayeen. Muxuu sameeyey Ciise?




Wuxuu arkay doon ku dhwo, Ciise wuxuu fuulay doontii dusheeda. Iminka wuxuu arkaa dadkii oo dadkiina isaga way arki karaan oo maqli karaan.




Ciise wuxuu bilaabay inuu u sheego masaaladii – sheekooyinkii qaabaysnaa eek u saabsanaa waxyaalihii dadku barayay Ilaah.

“Beerey baa ku saydhay beertiisii abuur.”
Sheekadii Ciise waxay u ekeyd sidii
sawir ay la jiraan ereyo la dul qoray.



Dadkuna ay sawiri karaan shaqadii beereyga – waxayna arkeen in badan.




Qaar ba jidka geesekiisa abuurkii ku dhacay, Way haadeen! Markiiba shimbiro u yimidoo wey cuneen.




Qaar kalena waxay ku dhaceen dhul dhagax ah oo aan xcarro badan lahayn. Durbadiiba wey soo baxeen. Laakiin qorxdii markii ay soo baxday wey gubteen, wana engageen, sabata oo ah carradu aad uma sii dheeerayn.




Qaar kalena waxay
ku dhaceen qodxan,
qodxaantiina way soo
baxday oo ceejisay.



Intii kale ee hadhay ee abuurka ahayd dhul wanaagsan bay ku dhaceen oo ay midho dhaleen. Hadhuudh badan bayna dhaleen. Beereygiina aad buu u farxay.



Dhammaadkii sheekadii, xertii ayaa u timid Ciise.
“Maxaad masaallo ugu barataa?” ayay waydiiyeen.



Ciise na wuxuu yidhi masaaladan dadka waxay ka caawiniyaan inay fahmaan waxyaalaha Ilaah ku saabsan waa haddii ay jecel yihiin Isaga.




Ciise wuxuu u fasiray masaaladii. Waxuuna yidhi abuurka waa Ereyga Ilaah. Abuurkii jidka geestiiis la dhacay wuxuu la mid yahay qof
maqlay laakiinse aan fahmin Ereyga Ilaah.
Shayddaan baa ilowsiiyey wixii uu Ilaah kula hadlay.


Dadka qaar baa durbadiiba qaata Ereyga Ilaah. Kuwaa waxay la mid yihiin abuurkii sheekadii carrada kuwii ku dhacay. Laakiinse jsla marka qof ku qosqoslo iyaga ama ay dhibaateeyaan jaceylka Ilaah dartii, wax qalaad baa ku dhaca.

Dadka noocan ah ee si farxad leh ku bilaaba inay raacaan Ciise way ka beedhaan oo joojiyaan adeecidda Ereyga Ilaah. Mana doonyaan inay qiimo ku bixiyaan raacidda Ilaah. Sidee bay u xun tahay inay mamusaan saaxiibadood intey adeeci lahaayeen Ilaah!



Qaarkii qodxaanta ku dhex dhacday ee masaalkii waxay la mid yihiin kuwa ka walwala adduunka oo jecel lacagta badan oo li foan inay hesho noloshooda.



Laakiin abuurkii ku dhacay dhulkii – ciiddii wanaagsanayd ee la siiyey midhihii fiicnaa waxay la mid yihiin kuwa uu galay qalbiyadooda Ereyga Ilaah oo uu bedelay noloshooda.  Dadkaa weeye dadaka u adeega oo sharfa Ilaah.



Dadkii badnaa ee isu soo ururuay waxay doonayeen inaysan ka tagin. In badan baan raacday oo amaantay Ilaah. Maahmaahyadii Ciise waxay ka caawiyeen inay fahmaan sida Ilaah loo addeeco.



Beeraleygii iyo Abuurkii

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 13

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

# Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16